

## Horumarinta Qorshaha Sinnaanshaha Jinsiga

Vision Action Network iyo hawl-wadaagayaashaada bulshada Adelante Mujeres, Shabakada Aasiyaanka Baasifiga Maraykanka ee Oregon, Bienestar, iyo Isbahaysiga Bulshada Midabyada Kala Duwan leh ayaa isku yimid si ay u horumariyaan sinnaanshaha jinsiga ee Degaanka Washington isla markaana u wanaajiyaan natiijooyinka loogu talagalay dadka midabyada kala duwan leh ee dhanka waxbarashada, dhaqaale wanaaga, iyo ka qayb qaadashada bulshada.

Laga bilaabo Janaayo ilaa Abriil 2019, waxaanu qabanay laba kulan oo degaanka oo dhan ah iyo lix wada hadalada bulshada oo dhaqanka u gaar ah kaasi oo isku keenay in ka badan 500 oo dad ah oo ka kala socday dowladaha hoose, hay'ado aan faa'iido doon ahayn, ganacsiyo, iyo bulshada cid matalaysaa aanay jirin. Kulankii u horreeyay ee degaanka oo dhan, ka qayb galayaasha waxay keeneen fikrado badan oo wanaagsan si loo horumariyo sinnaanshaha jinsiga, iyada oo kuwani ay kuwa uga sarreeyay:

1. Waxbarashada sinnaanta ku saleysan oo ay ku jiraan tababarka dhanka eexda/xaqdarrada aan laga warqabin 'implicit bias' oo loogu talagalay ardayda iyo waalidiinta dugsiga (iyo macallimiinta iyo maamulayaasha)
2. Yareynta/meesha ka saarida shuruudaha dhanka baaritaanka taariikh dembiyeedka ee loo isticmaalo baarista codsadayaasha ee loogu talagalay u qalmida barnaamijyada caawiya ama guryaha dakhligoodu hooseeyo
3. Kordhinta ka qayb qaadashada iyo mataalada dadka midabyada kala duwan leh ee dhanka guddiga bulshada iyo guddiyada caadiga ah
4. Barnaamijyada dugsiga hortii iyo dabadii oo lacag la'aan ah oo ay ku jiraan gaadiidku
5. Barnaamijyo talo siineed oo loogu talagalay dhallinyarada midabyada kala duwan leh iyo kooxdaha cid matalaysaa aanay jirin oo ay ku jiraan sida loogu ordo/la iskugu soo sharraxo xafiis
6. Kordhinta tirada ardayda midabyada kala duwan leh ee helitaanka tacliinta sare iyada oo la



*"Mataalad la'aanta bulshada Latinx (ee dhanka dowladda) waa mid walwal leh isla markaana waxyeello u leh aaminaada iyo kalsoonida."*

### CODADKA BULSHADA

Qaar ka mid ah waxyaabaha la ogaaday ee ka soo baxay wada hadalka bulshada waxaa ka mid ah baahi dheeraad ah oo loo qabo **tababar** waxtar leh oo ku saabsan aqoonta loo leeyahay dhaqanka; **goobo dadweyne** oo dheeraad ah oo dhiiri geliya kala duwanaanshaha iyo ka mid noqoshada; **matalaad** weyn oo dadka midabyada kala duwan leh ay ku yeeshaan dhanka dowladda iyo noloshaha bulshada; iyo **ilaha muhiimka ah** oo loogu talagalay qof kasta, iyada oo aan loo eegayn xaalada deganaansho.

- Xubinta Bulshada

## TALLAABO LA QAADO

Ka qayb qaatayaasha kulankii labaad ee degaanka oo dhan waxay qaateen fikradaha ugu wanaagsan iyaga oo soo jeediyay siyaabooyin wax looga qabanayo iyaga kuwaasi oo horseeday in la ogaado natiijooyinka muhiimka ee soo socda:

### MAWDUUCYADA MUHIIMKA AH

- Abuurida hab loogu talagalay dhallinyarada midabyada kala duwan leh iyada oo la adeegsanayo **barnaamijyo talo siineed** oo la isticmaalayo mas'uuliyiin/hoggaamiyayaasha bulshada kuwaasi oo ku dhiiri geliya iyaga in ay ka qayb qaataan dhanka bulshada isla markaana qaadaan tallaabo dhanka doorarka hoggaamineed ah.
- Bixinta **tababar** ku saabsan eexda/xaqdarrada aan laga warqabin 'implicit bias', awoodda dhaqan ahaaneed, iyo kala duwanaanshaha si loo wanaajiyo jawaab ka bixinta dhacdooyinka nacaybka/xaqdarrada/cunsurinimada ku dhisan.
- **Isku xirka iyo dib u qoondaynta ilaha muhiimka ah** si mudnaanta loo siiyo dadka midabyada kala duwan leh. Wada shaqeyn la sameeyo si meesha looga saaro caqabadaha jira isla markaana loo abuuro helitaanka wanaagsan oo loogu talagalay dadka midabyada kala duwan leh ee aan qabin dareenka wanaagsan iyo in aan la soo dhaweynayn inta ay qorsheynayaan nidaamka maanta jira.
- **Shaqaaleysiinta** macallimiin iyo shaqaalaha dugsiga oo kala duwan si ay si fiican uga turjumaan ardayda iyo bulshada oo dhan, iyo si ay u dhiiri geliyaan in dhallinyarada midabyada kala duwan leh ay raacaan dariiqooda.

## Matalaada Ilaha Tababarka

### La talinta Goobaha Dadweyne oo Soo dhaweyn leh

### MAWDUUCYADAAHA IYO QORSHAYAASHA MUHIIMKA AH

- **Matalaada dheeraad ah oo ay yeeshaan dhallinyarada midabyada kala duwan leh** si ay si dhab ah uga turjunto bulshada.
- **Awoodsiinta dadka midabyada kala duwan leh** si ay go'aan qaadashadu uga turjunto bulshada oo idil.
- **Maalgelinta dhallinyarada midabyada kala duwan leh** si loo abuuro hab rajo leh oo loogu talagalay mustaqbalka.
- **In meesha laga saaro caqabadaha nidaamsan ee hadda jira** si loo kordhiyo fursadaha loogu talagalay dadka midabyada kala duwan leh ee dhammaan qaybaha kala duwan.



Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir:

Vision Action Network  
info@visionactionnetwork.org  
503-846-5792

*Dadaalada sida xaqiijinta in ardayda sanadkii u dambeeyay dhigata dugsiga sare ay diiwaan gashan yihiin si ay u coddeeyaan waxay keentaa isbeddel."*